# Shahaadada La Kordhiyey
# 2009-2010

Shahaadada la kordhiyey waa tan la gudoonyiiyey arday loo aqoonsaday waxbarashadda gaadhka ah ee ka qaybgalay qiimaynta la kordhiyey ee Oregon islmarkaana gaadhay 12 qayb oo saacadahii la isugeeyey ee maadooyinkii waxbarashadda guud, maadooriyinkii waxbarashadda guud ee la cadiley iyadii oo ay la jiraan ama aysan la jirin waxyaabaha daruuriga ah ee uu ardaygu ubaahanyahay iyo/ama maadooyinkii la cadiley. In ka badan 6 saacadood lagama qaadan karo barnaamijyadda ku salaysan gaadhka ah. Inta badan ardaydu way ku guulaystaan in ay kasoo baxaan shuruudaha shahaadada dugsiga sare, siday noqotaba, degmadu waxay aqoonsantahay in tiro yar oo ardayda ah aysan awoodin in ay gutaan manhajka caadiga ah xataa iyadii oo la siiyey wax walba oo uu ardaygu u bahnaa ama la cadiley.

**Maxaa Loo Tixgelinayaa Shahaadada La Kordhiyey?**

Shaadada la kordhiyey waxaa la siiyey Ardayda waxbarashadda gaadhka ah ee ka qaybgalay qiimeynta la kordhiyey ee Oregon labadii sanno ee lasoo dhaafay ee aan ka dambaynin fasalka 6aad, islamarkaana ay ka muuqatay in uusan kasoo bixi Karin heerka akadeemiyadeed oo dhamaystiran, xataa hadii la siiyey waxyaabihii ardaygu u baahnaa oo dhan, walow uu kasoo baxay shuruudihii Shaadada la kordhiyey sida lagu qeexay Gudiga Waxbarashadda ee Gobolka Oregon. Shaadada la kordhiyey waxay u ogolaanaysaa si aan xadidneyn in wax loog abeelo wixii laga filyey ardayga iyo in uu gaadho baahida gaadh ahaaneed ee ardayga iyo sidii si wanaagsan loogu diyaarin lahaa marxaladda kala guur ee nolosha qaan gaadhka. Waxay u ogolaanaysaa in in badan laga hormariyo xagga shaqadda, khibradaha shaqadda, iyo maadooyinka xirfadaha shaqo. Shaadada la kordhiyey waxaa shardi u ah dhamaysashadda 12 saacadood, sida lagu qeexay Wasaaradda Waxbarashadda ee Oregon, ugu yaraana 6daa saacadood ay yihiin kuwa lagu qaatay nidaamka waxbarashadda guud. Go'aanka qaadashadda Shaadada la kordhiyey waxaa la gaadhi karaa oo ay tahay in aysan ka horaynin dhamaadka fasalka 6aad halka aysan ahayn in ay ka dambayso goorta uu ardaygu isu diyaarinayo in uu ka baxo dugsiga sare.

Manhajka la cadiley waxaa dhici karta in uu daruuri noqdo goorta ay cadaato in uusan ardaygu gaadhi Karin iyadii oo dhamaystiran heerka akadeemiyadeed ee uu manhajku ka koobanyahay, xataa hadii la siiyey dhamaan wixii ardaygu u baahnaa islamarkaana la cadiley. Arday keliya, waxaa dhici karta in loola jeedo Aljabra oo la cadiley in ay ka dhigayso in ardaygu gaadho qayb un ka mid ah heerka aljabra ee manhajka. Arday kale waxaa dhici karta in ay oga dhigantahay dhamaystirka maadooyinka asaasiga ah ee xisaabta ee heerka fasalka lixaad. Ujeedadu waa in laga dhigo ardayga in uu shaqeeyo si uu ugu talaabo xagga hore iyo himiladooda, halka la siinayo wax walba oo uu ubaahanyahay ardayga iyo/ama cadilaad ay dalbadaan.

Tixgelinta Shaadada la kordhiyey waa in qayb ahaan lagu daraa ka qayb qaadashadda Qiimeynta La Kordhiyey ee Oregon ugu yaraan laba sanadood laga bilaabo in aysan ka dambayn fasalka 6aad, iyadii oo aan laga tagaynin, walow aysan ku koobnayn, sooyaalka iyo gudashadda imika ee dugsiga, macluumaadka iyo caafimaadka, xaadiridda iyo dhibcaha, macluumaadka laga helo waalidka, macalinka iyo ardayga.

Isbedel dhab ah oo ku yimaada xaaladda caafimaad ee ardayga ama sooyaalka waxbarasho kadib fasalka 8aad waxaa suuragal ah in loo tixgeliyo hadii ay tahay natiijo ka dhalatay Qiimeynta La Kordhiyey ee Oregon.

**Ardaygu Miyuu Heli karaa Weli Shahaadada La Cadiley ama Shahaadada Dugsiga Sare?**
Macluumaadka shahaadada waxaa dib-loo-eegaa sanad walba kadib goorta la gaaro go'aanka ah in uu ka shaqeeyo Shaadada la kordhiyey. Ardaygu waa uu bedelan karaa qorshaha Shahaadada La Cadiley ama qorshaha shahaadada dugsiga sare, walow ay tahay in uu kasoo baxo dhamaan shuruudaha shahaadada. Go'aanka in aad qaadato Shaadada la kordhiyey waa in la gaadhaa oo keliya kadib tixgelin taxadar leh oo ku jeeda faa'iidada iyo khasaaraha ka dhalan kara. Ardayda waxaa dhici karta in ay ka in ay wax ka dhimanaadaan xagga saacadaha hadii ay doortaan in ay bilaabaan qorshaha Shaadada la kordhiyey kadibna ay oga wareegaan shahaadada la cadiley ama qorshaha shahaadada dugsiga sare. Tusaale waxaa dhici karta in ay wax ka dhimanaadaan saacadaha Adabka Luqadda iyo Sayniska. Isbedel noocaas oo kale ah waxaa ka dhalan kara in ardaygu uu xaadiro dugsiga sare in ka badan afartii sanno ee caadiga ahayd.

**Tixgelinta:**

- Ardayga waa in loo aqoonsadaa waxabarashadda gaadhka ag islamarkaana uu ka qaybqaatay qiimeynta Oregon ee la kordhiyey ugu yaraan laga bilaabo aanan kana dambayn fasalka 6aad hadii uusan jirin isbedel dhab ah oo ku yimid xaaladda caafimaad ee ardayga ama sooyaalka waxbarasho kadib fasalka 8aad
- 